



# Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Maraykanka

## Qaybta Mushqaayadda iyo Saacadda



### MACLUUMAADKA ASAASIGA AH

cusub laga soo qaado Juun 2012

Waxda Mushqaayadda iyo Saacadda (WHD) ee Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha Maraykanka ayaa mas'uul ka ah dhaqan-galinta iyo hirgelinta xeerarka dejinaya shuruudaha ugu yaraanta loo aqbali karo mushqaayadaha iyo xaaladaha shaqaynta ee gudaha dalkan, iyada oo aan loo eegin xalaadda imgreeshinka qofka.

### XEERKA QIYAMYADA SHAQADA EE CAADDILKA AH




Xeerka Qiyamyada Shaqada ee Caaddilka ah (FLSA) ayaa saamaysa shaqooyinka meheradaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowladdaba. FLSA ayaa uga baahan loo-shaqeeyayaashu inay siiyaan shaqaalaha hoos yimaad ee aan ka-dhaafsanayn xeerkeeda ugu yaraan mushqaayadda ugu yaraanta federaalka iyo bixinta wakhtiga dheeraadka ah ee dhammaan saacadaha la shaqeeay ee dheeraadka ku ah 40ka toddobaadka shaqada.

Shaqaalaha hoos yimaad xeerka waa in la siiyo dhammaan saacadaha la shaqaystay lacagtooda toddobaadka shaqada. Guud ahaan, saacadaha lacagteeda la bixinayo waxa ka mid ah wakhtiga hawsha la guto oo dhan ama qofku joogo meel shaqo oo loo gartay iyo wakhti kasta oo shaqaale xammilo ama loo oggolaado inuu shaqeeyo. Guud ahaan

taas waxa ka mid ah shaqada hawlgalaka lagu sameeyo guriga, wakhtiga safarka, wakhtiga sugitaanka, tababaritaanka, iyo waqti shaqo tijaabinta ah.

- Mushqaadda Ugu Yaraanta Federaalka Ah: \$7.25 saacaddiiba laga soo bilaabo July 24, 2009
- Shaqaalaha bakhshiishka la siiyo ayaa la siin karaa \$2.13; haddii ayna bakhshiishka shaqaalaha oo lagu daro mushqaayadda lacagta kaashka ahi ayana u dhigmin mushqaayadda ugu yaraanta, loo-shaqeeyuhu waa inuu kabo farqiinta intaa u dhexeeya.
- Saacadaha dheeraadka ku ah 40ka saacadood ee toddobaadka = 1 ½ marka lagu dhufto saamiga caadiga ah ee lacag bixinta shaqaalaha

### SHAQAYNTA CARRURTA



FLSA ayaa sidoo kale xeerkeeda maamusha shaqaalaynta da'yarta.

Shaqooyinka Da'yartu Ay Qaban Karaan:

- 13 jir ah ama ka yar: ilmo-haynta, qaybinta wargeysyada, ama ku shaqeeeya aktar ama jile ahaan
- Da'yarta 14-15 jirka ah: qaarkood ayaa loo oggool yahay goobaha shaqada ee ay ka midka yihiin shaqada xafiiska, dukaanka raashinka, dukaanka tafaariiqda, makhaayadda, shaneemada, iyo xadiiqadaha madaddaalada
- Da'da 16-17: Shaqo kasta oo aan loo garan inay halis tahay


- Da'da 18: Waa mamnuuc la'aan

Saacadaha Da'yarta Da'doodu tahay 14 iyo 15 Ay Shaqayn Karaan:

- Ka dib 7da subaxnimo iyo ilaa 7da fiidnimo (saacadaha ayaa loo kordhiyaa ilaa 9ka fiidnimo Juun 1-Maalinta Shaqada iyo Shaqaalaha)
- Ilaa 3 saacadood, oo ay ku jiraan Jimceyaasha maalinta dugsiga
- Ilaa 18 saacadood toddobaadkii dugsigu jiro
- Ilaa 8 saacadood maalintii aanu dugsi jirin
- Ilaa 40 saacadood toddobaadka aanu dugsi jirin

**Xusuusin:** Sharciyo ka duwan ayaa khuseeya dhalinyarada ka shaqeeya beeraha. Gobollada ayaa waliba nidaam sharciyeeya saacadaha dhallinyarada ka yar 18 jirku ay dhici karto inay shaqeeyaan. Si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka federaalka ama gobolka, dhaxgal [www.youthrules.dol.gov](http://www.youthrules.dol.gov)

### XEERKA UGA MAQNAANSHAHA SHAQADA QOYSKA IYO CAAFIMAADKA



Xeerka Uga Maqnaanshaha Shaqada Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA) ayaa khuseysa loo-shaqeeyayaasha shaqaaleeya in ka badan 50 shaqaale ama in kaban, hay'adaha dowladda, iyo dugsiyada hoose iyo sare. Shaqaalaha uqalma ayaa u mutaysan inay qaataan maqnaansho lacag bixin la'aan ah, oo loo ilaaliyo-shaqada iyaga oo ay u socdaan caynsanaanta caymiska caafimaad ee kooxda ilaa 12 toddobaad-shaqo ilaa muddo 12 bilood ah oo loogu talagalay:

- dhalashada iyo daryeelka ilmaha dhashay;
- ku meelaynta iyo daryeelka ilmaha sida

joogtada ama ku meelgaarka loo korsanayo;

- xaaladda caafimaad ee daran ee qofka shaqaalaha ah ama afada ama seyga, ilmaha, ama waalidka qofka shaqaalaha ah;
- baahiyada arrimaha uqalma ee ka soobaxa xubinta ciidamada hoos yimaad caynsanaanta xubinta ciidamada waajibaadkooda haatan u gudanaya.

iyo 26 shaqo-toddobaad maqnaansho muddo 12 bilood ah inta lagu jiro loo daryeelo xubin ku jira ciidamada oo qaba dhaawac ama cudur halis ah.

### XEERKA ILAALINTA SHAQAALAHAA BEERAHA HIJROODKA IYO XILLIYEEDKA AH



Xeerka Ilaalinta Shaqaalaha Beeraha Hijroodka iyo Xilliyeedka ah (MSPA) ayaa uga baahan qandaraaslayaasha, loo-shaqeeyayaasha beeraha, iyo ururrada beeraha "shaqaaleeya" shaqaaluhu inay:

- Siiyaan shaqaalaha mushqaayadaha ay ku leeyihiin goorta ay bixintu joogto
- U hoggaansamaan shuruudaha badbaadada iyo caafimaadka federaalka iyo gobolka

haddii ay siiyaan guriyayn shaqaalaha soo-haajiryaasha ah

- Hubiyaan in gaadiidka ay u isticmaalaan qaaditaanka shaqaaluhu ay sida habboon caymis u leeyihiin, oo ay wadaan darawallo sharciyeysan, lana kulmaan shuruudaha badbaadada federaalka iyo gobolka
- Ka bixiyaan bayaan buuxda oo qoran oo shuruudaha iyo xaaladaha shaqada.

NAGALA SOO XIRIIR:  
**1-866-4US-WAGE**

MACLUUMAAD DHEERAAD AH AYAA LAGA HELI KARAA:

YOUTHRULES!: [WWW.YOUTHRULES.DOL.GOV](http://WWW.YOUTHRULES.DOL.GOV)

BARTA INTERNETKA WHD: [WWW.WAGEHOUR.DOL.GOV](http://WWW.WAGEHOUR.DOL.GOV)

ELAWS: [WWW.DOL.GOV/ELAWS](http://WWW.DOL.GOV/ELAWS)

BARTA INTERNETKA DOL: [WWW.DOL.GOV](http://WWW.DOL.GOV)